



Ogow xaqiiqooyinka ku saabsan COVID-19

Waa maxay COVID-19?

COVID-19 waa ifilo iyo hargab u eg sida xanuunka uu sababo fayraska cusub ee korona. Inkastoo dadka badankooda ay la kulmaan astaamo fudud, dadka qaar ayaa si daran ula bukooda oo u dhinta caabuqa. COVID-19 aad ayuu u faafaa. Tallaalku waa agabka ugu fiican ee looga hortago isbitaal dhigista iyo dhimashada ka dhalan karta COVID-19. Daawooyinka waxtarka leh ayaa lagu heli karaa rijeetada loo soo qoray dadka cudurka halista sare ugu jira iyo kuwa uu ku dhacay fayraska.



Sidee buu ku faafa fayraska korona?

Qofka cudurka qaba wuxuu faafin karaa COVID-19 markay astaamuhu muuqdaan ama markay astaamuhu muuqan. COVID-19 waxaa uu asal ahaan ku faafaa gobo'da soo baxo marka qof cudurka qaba qufaco, hindhiso ama hadlo. Dhibcahaani ayaa cudurka qaadsiiyo dadka kale markay gaaraan goob qoyan oo ah sanko, afka, cunaha, indhaha ama sambabada qofka kale. Waxaa la rumeysan yahay in tani ay badanaa dhacdo markay dadku isku dhow yihiin – isku jiraan in ka yar lix fuud. COVID-19 waxaa sidoo kale lagu kala qaadaa ku taabashada gacmaha qabo fayraska indhaha, sanko, ama afka.

Maxay yihiin astaamaha oo intee ayay dhan tahay darnaashada COVID-19?

Markuu ku dhaco cudurka, bukaanada COVID-19 waxay yeelan karaan astaamo kala duwan. Dadka qaba cudurka badanaa ma qabaan wax astaamo ah haba yaraatee ama waxay qabaan astaamo aad khafiif u ah oo u eg kuwa hargabka. Dadka qaarna waxay la kulmaan astaamo daran oo u baahan isbitaal dhigid, daawo iyo mararka qaarkood in lagu xiro qalabka hawo-siinta. Dadka yeesho astaamaha daran ee nafta halis galinaya badankood waa kuwo da' weyn ah waxayna qabaan cudurada raaga.

Carruurto aad ayay u yar tahay inay si daran ugu jirraadaan COVID-19 marka loo eego dadka da'da ah, si kastaba ha noqotee isbitaal dhigista iyo dhimashada ka dhalata COVID-19 ayaa lagu sheegay carruur yar 18 jir ee ku sugan Oregon.

Astaamaha



Qufac



Qarqaryo



Qandho



Cune-xanuun



Muruq ama jir xanuun



Luminta dareenka dhadhanka ama urta oo cusub



Neefta oo yaraato ama neefsashada oo dhib ah

Astaamaha kale ee COVID-19 waxaa ka mid ah:

- Cabbur ama dililiq
- Lallabo ama matag
- Shuban
- Daal
- Madax-xanuun



Yaa halis ugu jira cudurka?

Dhammaanteen halis ayaannu ugu jirnaa cudurka – fayraskani si fudud ayay dadku iskugu gudbiyaan. Waxaa loo maleynayaa in wax ka badan kala bar isku gudbinta COVID-19 ay ka timaado shaqsiyaadka leh astaamo yar ama aan lahayn wax astaamo ah. Waxaanu hadda fahamsanahay in dadka waayeelka ah, kuwa qaba xaaladaha cudurada raaga, kuwa ku nool goobaha daryeel kooxeed, iyo shaqaalaha daryeelka caafimaad ay si gaar ah halis ugu jiraan inuu ku dhaco xanuun halis geliyo nolosha.



Sidee ayaan cudurka uga ilaalin karaa naftayda iyo dadka kale?

Tallaabooyinka aad qaadi karto waxa kamid ah:

- Istallaal oo la soco tallaalada cusub adigoo qaadanaya garoojooyinka xoojinta ah marka aad u qalanto.
- Marka aad joogto gudaha meel dadka isugu yimaadaam ama meel ay dadku ku badan yihiin, xiro maaskaro si fiican ugu habboon afkaaga iyo sankaaga.
- Si joogto ah u dhaq gacmahaaga.
- Haddii aad halis sare ugu jirto cudurka, lix fuud (laba tallaabo oo waaweyn) ka fogow dadka aan ka tirsanayn gurigaaga (kala fogaanshaha jireed).
- Haddii aad isku aragto astaamo, ku nagow guriga oo ka fogow dadka kale oo laftaada iska tijaabi cudurka COVID-19.
- Haddii aad ogtahay inaad hindhisi doonto – ka fogow dadka kale oo dabool afkaaga iyo sankaaga (ku dabool tiish ama xusulka xitaa markaad xiran tahay maaskaro).
- Haddii aad tahay qof da' ah ama aad halis sare ugu jirto COVID-19, la qorshee bixiyahaaga daryeelka caafimaadka hadda sida aad ku heli doonto daawaynta haddii aad qaado COVID-19.
- Nadiifi oo jeermiska ka dil sagxadaha iyo walxaha la taabto.

Helida dokumintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir COVID-19 Communications Unit 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.

Oregon Health Authority
QAYBTA CAAFIMAADKA FAYO-DHAWRKA